



Liiska Hubinta ee Safarka Xajka

Socdaalku wali wuxuu kordhinayaa fursadaada aad ku qaadi karto oo aad ku faafin karto COVID-19. **Ha safrin haddii aad jiran tahay ama lagaa helay COVID-19.** U isticmaal liiska hubinta hage ahaan si aad si badbaado leh ugu safarto Makko, Sucuudi Carabiya.

Kahor Safarka

- Is-baar inyar kahor intaadan safrin. Baaritaan bilaash ah ayaa laga heli karaa Adeegyada Dib-u-dejinta Bulshada Soomaaliyeed, iyo Minneapolis/St. Paul Airport.
- Hubi inaad wada qaadatay tallaaladaada COVID-19, oo ay ku jiraan kuwa xoojiyaha ah, oo weydii bixiyaha daryeelka caafimaadkaaga wixii ku saabsan tallaalada kale ee aad u baahan karto kahor intaadan safrin. Tallaalada COVID-19 ee bilaashka ah ayaa laga heli karaa goobta tallaalka bulshada ee Mall of America.
- Ogow tilmaamaha COVID-19 ee hadda ee Sucuudiga. Ka hel xog barta xogta COVID-19 (<https://sa.usembassy.gov/u-s-citizen-services/covid-19-information/>).

HUBSO INAAD QAADATO:

- ✓ Tijaabooyinka degdega ah ee COVID-19. Tijaabooyin degdega ah oo bilaash ah ayaa laga heli karaa Adeegyada Dib-u-dejinta Bulshada Soomaaliyeed.
- ✓ Maaskaro tayo sare leh oo loogu talagalay qof kasta oo la safraya kooxdaada.
- ✓ Macluumaadka xiriirka degdega ah.
- ✓ Kaarka tallaalka COVID-19 ama rikoodh elektaroonig ah oo muujinaya caddaynta tallaalkaaga COVID-19.
- ✓ Nadiifiyaha gacanta ee yar.

Inta safarka lagu jiro

- In kasta oo aanay ahayn shuruud, CDC waxay ku talinaysaa inaad ku xirato maaskaro garoonka, diyaaradda, iyo gudaha gaadiidka dadwaynaha sida basaska iyo wadaagidda raacitaanka si ay kaaga caawiso inaad naftaada ilaaliso markaad safarka ku jirto.
- Ku xiro maaskaro masaajidda iyo meelaha kale ee bulshada dhexdeeda ah marka lagu taliyo ama loo baahdo.
- Haddii aad bilowdo inaad dareento jirro ama aad leedahay astaamo, isticmaal baaritaan degdega ah ee COVID-19.
- Haddii aad iska hesho, ha safrin, xiro maaskaro, oo xaddid tirada dadka aad la kulanto.
- Is baar kahor intaadan ku laaban Minnesota. Baaritaanka PCR ee COVID-19 waxaa laga yaabaa inay u baahato shirkaddaada safarka caalamiga ah ee dib ugu noqoshada Mareykanka.

Kadib Safarka

- Iska baar COVID-19 saddex ilaa shan maalmood kadib safarka. Isla markaaba is baar haddii aad isku aragto astaamo. Haddii aanad wada qaadan tallaaladaada COVID-19, guriga joog shan maalmood kadib safarka.
- Ogoow: Waxaa suurtoagal ah in aad u bukooto cudurro kale markaad safrayso. Haddii aad jiran tahay oo aanad ka soo roonaanayn, aad rug caafimaad oo u sheeg bixiyaha daryeelka caafimaadka inaad dhawaan u safartay Sucuudiga. Waxay kaa caawin karaan in la ogaado haddii aad u baahan tahay in lagaa baaro cudurrada kale ee ku badan Sucuudi Carabiya, sida Cudurka Neefmareenka Bariga Dhexe (MERS).

